

Garsoorayaasha doorashadu waa shaqaale ku meel gaar ah, oo mushaar qaata kana tirsan saraakiisha doorashada maxalliga ah oo loo tababaray in ay wax ka qabtaan dhammaan dhinacyada cod bixinta ee goobta codbixinta. U adeegida ka garsoore doorashada ahaan waa fursad lagu barto doorashooyinka, waana adeeg weyn oo bulshada loo qabto.

SIDA LOO CODSADO

Waxaad wax badan ka ogaan kartaa adiga oo la xiriira xafiiska doorashada ee magaalada ama degmadaada. Booqo boga internetka **Noqo Garsoore Doorasho** ee mvotes.gov si aad u heshid xiriirinta (links) ee habraacyada codsiga ee doorashada iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mawduuca. Sannad tiro dhabana ah, waxaad sidoo kale la xiriira kartaa xisbigaaga siyaasadda kahor bisha Maajo 1deeda. Haddii aaggaagu uusan ku qornayn bogga internetka, buuxi foomka daneynta noqoshada garsooraha doorashada oo iimayl ahaan ugu dir xafiiska doorashada degmadaada.

YAA CODSAN KARA

Waa in aad xaq u leedahay in aad ka codaysa Minnesota oo aad isla markaana akhrrin karto, qori karto kuna hadli karto luuqada Ingiriiska.

Xakameynta qaarkood waxaa ka mid ah:

- Qaraabada (xaas, waalid, adeer, ilmo, adeer, walaal ama walaal guur isku keenay) isku mar kama wada adeegi karaan goob codeyn oo isku mid ah.
- Qaraabada musharixiinta, iyo qof kasta oo kula nool meel ama ay guri isla degan yihiin murashaxa, kama shaqayn karo goobta codeynta uu murashaxaasi ku qoran yahay warqaddeeda codbixinta.
- Musharixiinta kama shaqayn karaan goobaha codeynta ee ay ku qoran yihiin warqadda codbixinta.

ARDAYDA DUGSIGA SARE EE TABABARANAYSA

Ardayda da'doodu tahay 16 iyo 17 sano waxay u shaqayn karaan tababartayaal garsoore doorashada ahaan, waxayna heli karaan tababaro, waxaana lagu siin karaa mushaharkooda shaqada ay qabanayaan iyaga oo khibrad weyn u helaya resameeyadooda.

- Laguma waydiin doono in aad shaqeyso 10:00 habeenimo wixii ka danbeeya.
- Waxaa lagu xilsaari doonaa isla waajibbaayada garsoorayaasha kale, marka laga reebo hawlaha u baahan xisbi ka mid ahaansho.
- Waxaad u baahan doontaa in aad ka qaybgasho oo aadna soo qaadato tababar la mid ah kan garsoorayaasha ay qaataan oo kale.

Si aad ugu qalanto noqoshada garsoore, waa in aad tahay 16 ama 17 jir maalinta doorashada ama ka hor, tahay muwaadin Maraykan ah oo haysatana dajo warbarasho oo wanaagsan kuna jira waxbarasho dugsiga sare ee Minnesota (ama guriga wax ku barta [home schooled]), oo aad fasaxna ka heysatid waalidkaaga iyo iskuulkaaga.

MUSHAARKA

Waxaad kala dooran kartaa in aad tabaruc ku shaqeyso ama lacag lagu siiyo. Mushaarku la qaato waa kala duwanan yahay goob ahaan iyo khibrad ahaan. Ardayga la tababarayo waa in la siiyaa wax aan ka yarayn saddex meelood labo meel mushaharka ugu yar.

GOOBTA SHAQADA & WAQTIGA AAD KU QORAN TAHAY

GOOBTA: Dadka qaangaarka ah ee da'doodu ka weyn tahay 18 sano JIR waxay u adeegi karaan garsoore doorasho ahaan meel kasta oo Minnesota ka mid ah, taas oo ku xiran ilaa inta ay ka go'an tahay in ay safrayaan. Dadka tababarka qaadanaaya waxay ka adeegi/shaqayn karaan degmada ay degan yihiin ama degmooyinka la deriska ah oo dhan.

TABABARKA: Waa in aad qaadataa tababarka loo baahan yahay kaas oo socon doona qiyaastii laba saacadood. Fasalo badan ayaa fiidkii la bixiyaa.

MAALMAHA SHAQADA: Maalmaha shaqadu waa maalmaha ay dhacayaan doorashooyinka aasaasiga (primary) iyo kuwa guud. Xooga shaqaale yar ayaa inta badan loo baahan yahay marka ay dhacayaan doorashooyinka aasaasiga (primary) ah. Xaaladaha qaarkood, waxaad codsan kartaa in aad shaqeyso doorashada guud ee Noofembar oo kaliya.

JADWALKA MAALINTA SHAQADA: Jadwalka caadiga ah ee Maalinta Doorashada waa laga bilaabo 6:00 subaxnimo ilaa 9:00 fidnimo Xaaladaha qaarkood, waxaad codsan kartaa maalin barkeed in aad shaqeyso.

FASAXA SHAQADAADA CAADIGA AH

Loo shaqeyahaaga waxa looga baahan yahay in uu ku siiyo wakhtiga fasaxa shaqada si aad u noqoto garsoore doorasho iyada oo aan la lagaa jarin mushaharka. Si aad xaq ugu yeelato, waa inaad:

- Ku ogeysii loo shaqeyahaaga qoraal ahaan ugu yaraan 20 maalmood kahor Maalinta Doorashada.
- Ku lifaaq nuulka jadwalkaaga howsha iyo foomka heerka lacagta aad qaadaneysa ogeysiiskaaga qoraalka ah.

Waxa kale oo aad sameyn kartaa in aad si ikhtiyaari ah u qaadato fasax isla markaana aad dakhli dheeraad ah ahaan ugu heshid mushaarka garsooraha doorashada. Loo shaqeyuhu kuguma qasbi karo in aad fasax qaadato ama nooc kasta oo kale oo fasax lacag aad qaadaneysa ah.

2024 TAARIKHDA COD BIXINTA

HORAY U SII CODEE: Janaayo 19 - Maarso 4
DOORASHADA AASAASIGA AH EE MADAXWEYNAHA: Talaado, Maarso 5

HORAY U SII CODEE: Juunyo 28 - Ogoosto 12
DOORASHADA AASAASIGA AH: Talaado, Ogoosto 13

HORAY U SII CODEE: Siteembar 20 - Noofeembar 4
MAALINTA DOORASHADA: Talaado, Noofeembar 5



Sawir koodkaan ka qaado si aad u booqato boga **mvotes.gov** wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay